Oregon Department of Human Services
OFFICE OF DEVELOPMENTAL DISABILITIES SERVICES

## Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) Tilmaamaha Dib u cusbooneysiinta Medicaid oo loogu talagalay Qoysaska leh Carruurta Qabta Naafanimada Maskaxda iyo Korriinka (IDD) ee 2022

Tilmaamahani waxay sharraxayaan nidaamka dib u cusbooneysiinta iyo sida uu u shaqeeyo hadda adiga oo ka dhisan nidaamka cusub ee OregONEligibility (ONE). Adeegyada badankooda ee ilmuhu helo ee la adeegsanayo nidaamka adeeg ee Naafanimada Maskaxda iyo Korriinka (IDD) wuxuu farayaa in ilmahaasi la ogaado in uu u qalmo adeegyada IDD iyo Medicaid labadoodaba. U qalmida Medicaid waa in dib loo cusbooneysiisa sanad kasta. Nidaamkaasi waxaa loo yaqaanaa nidaamka *dib u cusbooneysiinta ama "dib u go'aaminta"* faa'iidooyinka. 2020, Oregon waxay bilawday isticmaalka nidaamka OregONEligibility (ONE) oo loogu talagalay dhammaan u qalmida iyo dib u cusbooneysiinta Medicaid.

## Su'aalaha Inta Badan La Iswaydiiyo

**Maxay tani muhiim u tahay?**

Haddii adiga ama xubin ka tirsan gurigaaga laga codsaday in uu dib u cusbooneysiiyo ama dib loogu go'aamiyo u qalmida Medicaid, xaqiiji in aad hubiso ogeysiinta si aad u aragto cidda leh dib u cusbooneysiin waqtigeedii la gaaray. Haddii uu ilmahaagu qoran yahay, waxay ka dhigan tahay in ilmuhu uu hadda helayo adeegyada Medicaid oo la joogo wakhtigii la xaqiijin lahaa in uu weli u qalmo. Haddii aadan dhammeystirin nidaamka dib u cusbooneysiinta, ilmuhu kaliya lumin maayo u qalmida Medicaid, ee wuxuu sidoo kale lumin doona helitaanka adeegyada lagu helayo nidaamka IDD. Aad bay muhiim u tahay in aad soo jawaabto haddii lagugula soo xiriiray email ama telefoon ahaan taasi oo ku saabsan dib u cusbooneysiinta u qalmida Medicaid.

**Waa maxay faa'iidada ay leedahay dib u cusbooneysiinta nidaamka Medicaid ee OregONEligibility (ONE)?**

Hadda iyada oo faa'iidooyinka Medicaid ay ka tirsan yihiin ONE, waa in ay waxyaabaha sida nidaamka dib u cusbooneysiinta mid u sahlan uga

dhigtaa qof kasta. Dhammaan macluumaadkaaga ka tirsan ONE ayaa loo isticmaali karaa dib u eegista si loo go’aamiyo u qalmida socota.

**Sidee baa la iila soo xiriiri doonaa marka dib u cusbooneysiin la iskaga baahan yahay?**

Marka dib u cusbooneysiinta u qalmida Medicaid la iskaga baahan yahay, warqad ayaa boosta lagu soo diri doonaa qiyaastii 60 maalmood ka hor inta aan la gaarin waqtigii dib u cusbooneysiinta. Bogga hore ee warqadani wuxuu u ekaan doonaa sidani:

English MED-044

Oregon HEALTH PLAN

P.O. Box 14015
Salem, OR 97309
Voice : 1-800-699-9075
Fax : 503-378-5628
TTY : 711
https://benefits.oregon.gov

Case #, Name

DHS Oregon Department of Human Services

EN 6/02/2022

Name
Address

**Please reply by:**
6/02/2022

**Important: Renew medical for your case**

5/31/2022

**Name**

It is time to renew medical benefits. We have to review your information to make sure you still qualify. If you do not renew, benefits will end. See the "How to renew" section of this letter for instructions.

Please respond by 6/02/2022 . If you do not respond by the due date, medical benefits will end. You will get a notice if benefits end for you or anyone on your case.

Waa in aad buuxisaa dhammaan tallaabooyinka ku jira warqadani, oo ay ku jiraan dib u eegista macluumaadka ku saabsan u qalmidaada Medicaid, bixinta wixii caddeyn ah ee la codsaday, iyo ka qayb qaadashada wareysiga lala leeyahay shaqaale ka socda Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS). Adiga ayaa ka mas’uul ah dejinta wareysiga; fadlan tixraac warqadaada, taasi oo u ekaan doonta sidan:

**Important**
This is your case ID: Case #
Please write this number on anything you send us.
Without your case number there may be delays.

Completing a renewal for the people listed below also requires an interview. You can interview over the phone or in person. To set up an interview, call 1-800-699-9075 or 711 (TTY):

Waa in aad dhammeystirtaa nidaamka dib u cusbooneysiinta oo dhan ama ku codsataa muddo kordhin waqtigii loo qabtay (“fadlan ku soo jawaab” taariikhda) ee lagu aqoonsaday warqadani. Haddii aadan ku soo jawaabin waqtigii loo qabtay, waxaad boosta ku heli doontaa warqad labaad oo loo yaqaan *ogeysiinta xiritaanka* oo kula socodsiinaysa in faa’iidooyinkii ilmuhu ay joogsanayaan dhammaadka bishaasi. Haddii aad hesho ogeysiinta xiritaanka, waxaa dhici karta in aad weli haysato fursad aad ku buuxiso codsiga dib u cusbooneysiinta oo dib ugu soo ceshato faa’iidooyinka Medicaid marka la gaaro dhammaadka bishaasi. Haddii aadan ka soo jawaabin labada warqadood midkoodna, faa’iidooyinka Medicaid waxay joogsan doonaan waxayna noqonaysaa in aad dib u dalbato. Xusuusnow in caymiska Medicaid uu ku xiran yahay adeegyada I/DD. Markaa, haddii qof lumiyo Medicaid, wuxuu sidoo kale lumin doonaa adeegyada I/DD. **Fadlan ha oggolaanin in uu dhaco wakhtiga dib u cusbooneysiinta Medicaid!**

**Sidee baan u cusbooneysiiyaa codsigayga Medicaid?**
**Dadka reer Oregon waxay Medicaid ku codsan karaan dhowr siyaabood:**

- **Internet-ka**: Waxaad nuqulada diiwaanadaada u gelin kartaa hab elektaroonig ah. Booqo https://benefits.oregon.gov si aad u gasho ama aad u samaysato bar aad internetka ku leedahay.
- **Shakhsi ahaan**: Booqo xafiisyada Dadka waaweyn iyo Dadka naafada ah ee ODHS (APD) iyo xafiisyada Isku-Filnaanshaha (SS) ee degaanka. Waxaad cinwaanka ka heli kartaa warqadaada dib u cusbooneysiinta ama adiga oo booqda https://benefits.oregon.gov oo riixaya “Get Help”.
- **Telefoon ahaan**: Xarunta Adeega Macmiilka ee ONE ka wac: 1-800-699-9075 laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama aad hayso su'aalo ku saabsan xirmada dib u cusbooneysiinta ONE, la xiriir ilaha ku qoran warqadaada wixii taageero ah.

**Miyuu ilmuhu u baahan doontaa dib u eegista u qalmida oo dheeraad ah, oo aan ka ahayn Medicaid?**
Carruurta qaarkood ayaa u qalanta Medicaid taasi oo ku saleysan naafanimadooda iyo in ay mareen nidaamkooda Kooxda Go'aaminta Naafanimada La filayo ee Medicaid (PMDDT) si ay u go'aamiso u qalmida. Carruurtaasi, dib u eegista xaaladooda naafanimo, oo ay dheer tahay dib u cusbooneysiinta Medicaid, ayaa la iskaga baahan yahay marka waqti la joogaba. Wakhtiga loo qabtay dib u eegista PMDDT wuxuu ku xiran yahay da'da ilmaha iyo naafanimo la ogaaday. Si kastaba ha ahaatee, wakhtiga loo qabtay dib u eegistani wuxuu badanaa la mid yahay taariikhda dib u eegista u qalmida Medicaid. Taasi awgeed, waa dhici karta in lagaa codsado in aad dib u cusbooneysiiso Medicaid iyo PMDDT isla waqtigaasi. Dib u eegista ay sameyso PMDDT waxaa loo yaqaanaa **Dib u eegista Sii wadashada Naafanimada (CDR).**

Dhammaan carruurta PMDDT oggolaatay waxaa loo qoondeyn doonaa taariikhda dib u eegista naafanimada. Taariikhaha la qoondeeyay waxay ku saleysan yihiin da'da ilmaha iyo naafanimo la ogaaday. Ujeedada laga leeyahay dib u eegistani waa in la go'aamiyo haddii ilmuhu weli u qalmo Medicaid taasi oo ku saleysan lahaanshaha naafanimada. Tusaale, marka carruurta qaarkood da'doodu weynaato, waxay bilaabaan in ay gaaraan korriinka muhiimka ah oo la mid ah sida qayrkooda/facooda oo kale. Xaaladaha qaarkood, waxaa dhici karta in ilmuhu uusan buuxin sharraxaada Xafiiska Social Security-ga (SSA) ee loogu talagalay naafanimada. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan waxa laga filayo nidaamka CDR, *fiiri Talooyinka, Qaybta A2.*

## Talooyinka marka Dib loo cusbooneysiinayo Medicaid ee la adeegsanayo Nidaamka OregONEligibility

**A1. Ka hor inta aadan soo wicin Xarunta Adeega Macmiilka ee ONE:**
Xarunta Adeega Macmiilka ee ONE ayaa furan 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo. Fadlan waxaad ogsoonaataa in waqtiyada khadka lagu jiro ay dhici karaan in ay dheeraadaan. Si taxaddar leh u raacista tilmaamaha dhanka afka ah waxay kaa caawin doonaan helida qofka saxda ah oo aad wakhti kooban ku helayso. Marka aad soo wacdo Xarunta Adeega

Macmiilka ee ONE, waxaad heli doontaa farriin salaan ah oo kaa codsanaysa in aad doorato luqad. Marka xigta, waxaad dooran doontaa sababta aad u soo wacayso.

**A2. Tani waa waxa aad filayso marka la joogo waqtigii dib loo cusbooneysiin lahaa u qalmidaada PMDDT.**

PMDDT ayaa kula soo xiriiri doonta waqtiga dib u eegista kaasi oo loogu talagalay macluumaadka cusub ee ka socda daryeel caafimaad bixiyayaasha ilmaha iyo dugsiga uu dhigto ilmuhu. PMDDT ayaa tixgelin doonta haddii ay jireen ka soo rayn dhanka caafimaadka tan iyo go'aankii rasmiga ahaa, iyo haddii ilmuhu weli buuxinayo shuruudaha naafanimada sida ku cad sharciyadeeda.

PMDDT ayaa eegi doonta aqoonsiga dhibaatada jirta iyo ilaa iyo xadka uu ilmuhu buuxinayo korriinka muhiimka ah. PMDDT waxay u baahan tahay **labo** sanadood oo ah diiwaannada caafimaadka, caafimaadka dhimirka, iyo waxbarashada si loo sameeyo go'aaminta caafimaad sida haddii ilmuhu buuxinayo shuruudaha naafanimada ee Xafiiska Social Security-ga (SSA) ee loogu talagalay u qalmida.

Inta badan waqtiga, isku duwaha adeegyada ee ilmaha ayaa kaa caawin kara isku soo ururinta dokumentiyadaasi:

- ✓ Liiska aqoonsiga dhibaatada jirta ee loo qalmo
- ✓ Dhammaan diiwaannada ka socda diiwaanka DD ee loo isticmaalay go'aaminta u qalmida DD.
- ✓ IEP u dambeeyay iyo wixii tijaabo/imtixaano ah ee uu sameeyay dugsigu ama ESD.
- ✓ Waa muhiim in la isticmaalo Bixinta Macluumaadka ee ODHS ee (ROI) ee foomka ODHS ee MSC 3010 ee saxda ah si loola wadaago daryeel bixiye kasta oo ilmahaagu arkay **2 sano ee u dambeysay** (marka laga reebo dhanka ilkaha). Waxaad u baahan doontaa mid loogu talalagalay Xafiiska Social Security-ga (SSA), iyo mid loogu talagalay dugsiga hadda ama dugsigii u dambeeyay. ROI loogu talagalay SSA ayaa la iskaga baahan yahay xataa haddii ilmuhu uusan helayn faa'iidooyinka Sugidda Dakhliga ee Kabista ah (SSI).

Wixii dokumenti ah ee aad bixin karto waa mid waxtar leh, oo ay ku jiraan wixii qiimeyn ah ee dhawaan la sameeyay iyo Qorshaha Waxbarasho ee Shakhsi (IEP) ee hadda jira. PMDDT waxay u baahnaan doontaa saxiixyada waalidka ama mas'uulka sharciga ah ee ku saabsan bixinta macluumaadka dugsiga hadda, mid loogu talalagalay SSA iyo mid loogu talagalay adeeg bixiye kasta oo ilmuhu arkay 2 sano ee u dambeysay. Waalidku waa in uu saxiixaa, taariikh u yeelaa oo xarafka magaciisu ka bilowda ku qoraa 4-ta saddar ee la dhowray ee ku saabsan bixinta. Haddii 4 sadar oo dhan aanan lagu qorin xarafka magaca qofku ka bilaabmo, daryeel bixiyayaal badani ma bixin doonaan diiwaanada kuwaasi oo dib u dhigi kara go'aanka PMDDT. Daryeel bixiyayaashu ma aqbali doonaan saxiixyada elektarooniga ah markaa waa in uu ahaadaa saxiix qoyan "wet signature." Haddii ilmaha da'diisu tahay 14 ama ka weyn tahay, waxaa dhici karto in laga codsado in uu saxiixo bixinta macluumaadka (Foomka ODHS ee 3010).

Haddii ilmaha la ogaado in uu caafimaad ahaan u qalmo Sugidda Dakhliga ee Kabista ah (SSI), waxaa dhici karta in aan loo baahan dib u eegis. Fadlan la socodsii shaqaalaha PMDDT haddii uu jiray go'aan uu lahaa Xafiiska Social Security-ga (SSA).

Kiisaska oo dhan waxaa dib loo eegi doonaa marka uu ilmuhu noqdo 18 jir si loo ogaado in uu buuxinayo shuruudaha qofka weyn ee loogu talagalay naafanimada. PMDDT waxay guud ahaan u baahan doontaa saxiixa qofka dhallinyarada ah ee weyn ee ku saabsan bixinta macluumaadka si loo helo diiwaannada.

Haddii uusan jirin dokumenti ku filan si loo gaaro go'aan caafimaad, waxaa dhici karta in PMDDT ay qabato jadwal qiimeyn oo loogu talagalay ilmahaaga.